# Banaamijka Helida Isku Dhafka SU'AALO & JAWAAB

**Guudmarka Barnaamijka**

Tabarucaada Waxbarasho ee Xarunta Safar-Badeedka Bulsho (Community Sailing Center's Diversity Access Scholarship) waa mid loogu tallo galay caruurta u dhaxeysa 11 - 15 oo isku sheega in ay yihiin BIPOC si ay uuga qeyb qataan kaamka xiliga jiilaalka. Kaamamkena xiliga jilaalka iyo barnaamijyada dhalin yarada ayaa loogu tallo galay in lagu baro caruurta bad baadada, xirfada, iyo farxada waarta ebid nolasha ee ciyaara safarka bada. Kaamka ayaa socon doono Isniin – Jimce laga bilaabo 9:00 am ilaa 4:00 pm. Ka qeyb qaata ayaa sidoo kale dooran karo Soo Bixida Waqti Hore ah iyo Soo Qaadid Waqti Danba, sidoo kale lacagta safarka isbuuc walbo waa $30. Ka qeyb qaatayaasha ayaa ku bilaabi doono kaamkena horudhaca ka qeyb qaatayaasha soo noqnayana waxa ay ka shaqeyn karaan ka gudbida darajooyinkena iyo barnaamijyada kale, oo ay ka mid tahay safar badeedka Dugsiga Dhexe iyo Dugsiga Sare.

**Waa maxay sababta ay CSC ay barnaamijkan u bixineyso?**

CSC waxa ay ogtahay in Lagta Champlain ay tahay mid kamida qeyraadkena ugu muhiimsan, laakiin waxaan ognahay in helida kaamka safarka biyaha iyo kaamka jiilaalku ay yihiin mudnaan qoys walbo uusan heli karin. Si loo sameyo isbadal waara oo quseyo helida lagta iyo casharada nolasha dhamaan dadka oo idil, hayadeena ayaa sameysay ka go'naan waqti dheer ah oo lagu hubinayo in shaqaalahena, gudigena, ka qeyb qalayaasha maalinle oo ay qeyb ka yihiin fikradaha iyo codadka kala duwan. Tani waa mid kamida farsado badan iyo gaarsiin ay CSC ay u sameyneyso dhalinyarada iyo qoysaska bulshada. Haddii aad jeclaan laheyd in aad wax badan ka maqasho waxa aan qabano, waxaad ka aqrin kartaa [Ka Go'naanta Isbadal].

**Waa maxay sababta barnaamijka deeqda waxbarasho ee Helida Isku Dhafnaanta loogu tallo galay dhowr isbuuc iyo sannoyin? Waa maxay ujeedka ka danbeyo dhamaadka barnaamijkan?**

Socdaalka biyaha waa ciyaar xamaasad leh isbadal badana leh, laakiin waxa ay u baahan tahay muraajaceyn si loo dhiso xirfadaha shaqsiga. Haddii ka qeyb qaatayaashu ku cusub yihiin ciyaartan, waxaan rabaa in aan u diyaarino guul joogta oo socdaalka biyaha. Hiigsiga ma ahan in shaqsiga loo diyaariyo horudhaca socdaalka biyaha, laakiin waa in lagu dhiiro galiyo isku dhaf waqtiga dheer ee mustaqbalka socodaalka biyaha ee koorsoyinka sare ee soo socdo, dadaalka socdaalka biyaha, iyo barnaamijyada carshar bixiyaha yar.

**Maxaa dhacayo haddii qofkeygu kaamka ka qeyb qaato hal sanno misna uusan rabin in uu sii wado?**

Waxaan jecelnahay in aan biyaha ku socono laakiin waxaan ognahay in uusan qof walbo sidaan aheyn. Inkasto uu hiigsigu yahay in uu qof walbo sii wado dhowr sanno, laakiin qof walbo sidaan ma ahaan doono. Isku dayga ciyaar cusub ayaa ah mid aad u adag iyo mid faa'iido badan. Inkasta uusan qof walbo uusan tagi doonin asagoo ah naaquude ebid inta nolashiisa ka dhiman, waxaan rajeyneena in uu ka tagi doono asaga oo ebid jecel lagta.

**Kaamam sidee ah ayaa la heli karaa?**
Kaamleyda ayaa ka bilaabi doono Darajada I iyo/ama Kala Barashada Lagta (Lake Adventure) sanadkooda koowaad, kadib waxa ay uuga gudbi karaan darajooyinka ka sareyo inta ay kobcayaan ka naaquude-yaal ahaan. Fadlan ogoow in tani aysan aheyn kobac horumar toosan, qof walbo oo kaamka ku jiro waxa uu qaadi doona waddo u gooni ah. WAxaa suurto gal in in dad badan oo kaamka ku jiro ay kusoo celiyaan darajooyin qaar sannado isku xig xiga si ay u adkeyaan xirfadooda.

**Meeqo isbuuc ayaan leyga rabaa in aan is diwaan galiyo?**
Waxaan ku talineyna in sanadka kowaad naaquudayaashu qaataan hal ama labo isbuuc oo kaamka, waxa ay ku xiran tahay sida ay jecel yihiin iyo qorsahooda. Kaamleyda soo noqoneyso waxaa ay badan tahay in ay qaadan doonaan labo-isbuuc lagu daray Dugsi Dhexe ama Dugsi Sare Socdaalka Biyaha ayada oo ay ku xirnaan doonto da'dooda iyo waxa ay jecel yihiin.
**Barnaamijyo sidee ah ayaa laheli karaa sannadka kowaad ee kaamka?**

Dadka marka ugu horeyso helay deeqda waxbarasho ayaa ka faa'iideysan karo hal ama labo isbuuc oo kaamka ah. Waxa ay qaadan karaan hal isbuuc oo Darajada I (11-15) ah, hal isbuuc oo Kala Barashada Lagta (11-15), ama hal kamida midkiiba. Haddii codsadayaashu aysan hubin waxii ilmahooda u wanaagsan, shaqaalaheyna ayaa u diyaar ah in ay kala hadlaan fursadaha ku haboon baahidooda iyo sida ay wax u rabaan. Sharaxaada kaamyada ayaa hoos ku xusan.

Qof walbo oo kaamka joogo ayaa qaadi doono wado u gooni ah inta kaamka lagu jiro. Inta uu qofka kaamka joogo horumar sameynayo, darajooyinka sare ayaa u baahan koorsoyin horudhac ah oo looga baahan yahay in ay soo qaatan marka hore. Waxaan diyaar u nahay in aan kaala hadalno kaamka ugu wanaagsan qofkaaga kaamka joogi doono anagoo kugu hageyno habraaca.

**Sharaxaada Kaamka**

- Darajada I (11- 15): Kaamleyda ayaa baran doono assaaska xarig tuurashada, goobaha laga baxo, isku socodka biyaha, bad baadada iyo dib usoo helida bad baado, deegaanka baashaal. Macalimiin qibrad leh ayaa hogaamin doono waxqabad yada bariga iyo biyaha ee loogu tallo galay sugnaanta raaxo iyo isku filanaanta doonta dhexdeeda.
- Kala Barashada Lagta (11-15): Kaamkan ayaa loogu tallo galay rabo in ay kala bartaan misna ku ciyaraan lagta. Waxaan ku wareegi doona Lagta Champlain ayada oo dhan laga bilaabo doomaha, oo ay ku jirto doonta alwaxa (canoe/kayak) oo aan la mari doono Lone Rock Point, doonta badeelaha ilaa Xeebta Waqooyiga, iyo wareega socodka biyaha ku harereysan Burlington Bay.
- Darajada II (12-16): Labadan isbuuc ee kaamka jiro waa habka ugu haboon ee lagu daba gali karo Darajada I (11-15) ee kaamka ama doorasho ku haboon dhalinta naaquudayaasha ee hadda bartay walxaha assaasiga ah. Marka dib loo raaco qiimeynta magac ubixinta iyo assaaska xarig tuurashada, bad baadada, iyo dhaqdhaqaaqa biyaha, naaquudayaasha ayaa u gudbi doono wax qabadyada biyaha ee isku keenaya

xirfadahan misna lagu baranayo kuwo cusub. Tani waa labo isbuuc kaam ah kaas oo socon doono laga bilaabo Isniin – Jimce.

- Darajada III (12-16): Labadan isbuuc ee koorsada kaamka ayaa daba socoto Darajada II (12-16), oo ah hor gale loo baahan yahay. Dhisida xirfadaha lagusoo bartay Darajada I iyo II, kaamkan ayaa lagu baran doona xiradaha biyaha dushooda iyo maareynta doonta, waxaana lagu bilaabi doona qalabka casriga ee xirfadaha tartanka iyo taatikoyinka la isticmaalo. Tani waa labo isbuuc kaam ah kaas oo socon doono laga bilaabo Isniin – Jimce.
- Dugsi Dhexe Socdaalka Biyaha: Xilliga deyrta, waxaad baran doonta xirfadaha socdaalka biyaha ee 23' keelboats keena adigoo la baran doono arday koox kale dugsi dhexe ah. Xilliga guga, waxaan ku socdaali doona labo dhinac-gacmoodle 420 dinghiers. Xoog saarid socdaalka biyaha dhaqsida iyo sida ugu haboon ee goob walbo lagu socdo. Horudhac barasho ee assaaska doonta tartanka ayadoo la baranayo isku filaanta socdaal wadid ee keelboats. Barnaamijkan waa labo maalin isbuuci inta lagu jiro saacadaha iskuulka kadib. Fasallada: 6-8.
- Northern Vermont Dugsi Sare Kooxda Socdaalka Biyo: CSC macalimiinta socdaalka biyaha ee dugsi sare ee deegaanka Northern Vermont Dugsi Sare Kooxda Socdaalka Biyo (NVHSST), xili waqtiyeed walbo waxaa dhalinta naaquudayaasha la siinaya fursad ay ku kobciyaan xirfadahooda ayna ugu tartamaan guud ahaan New England. Kooxda ayaa u furan arday walbo oo wanaagsan oo dhigto iskuulada shacabka, qaaska, ama iskuulada guriga ee Chittenden iyo wadamada ku hareersan. Kooxda ayaa wada muraajaceyn sameyso sadax maalin isbuuci iskuulka kadib, ayadoo ay jirto fasaxa iskuulka oo lagu sameyo guriga ama dibada Fasalka 9-12.

**Deeqada waxbarasho ma dabooleysa Soo Bixida Waqti Hore iyo/ama Soo Qaadida Waqti Danbe?**

*Haa, ka qeyb qaatayaasha ayaa sidoo kale codsan karo in lagu balaariyo deeqda waxbarasho maalmo dheeriya. Soo Qaadida Waqti Hore waxa ay bilaabaneysa 8am maalin walbo halka Qaadida Waqti Danbe ay ku egtahay 5:30pm maalin walbo.*

**Sideen ku heli karaa lacagta gaari raaca?**

*Lacagta gaari raaca waxaa lagu siin doona ka qeyb qaatayaasha jeeg ahaan, $30 kaambi isbuuca, isbuuca ka dib. Ka qeyb qaatayaasha ayaa laga rabaa in ay soo ogeysiiyaan CSC haddii ay rabaan lacagta marka ay is diwaan gelinayaan.*

**Waxaan heystaa dhowr qof oo noqon kara kaamley. Dhamaantood maka wada qeyb qaadan karaan!**

Haa! Kaamkeenu waxa uu u furan yahay da'da u dhaxeyso 6-16. Deeqda Waxbarasho ee Isku Dhafka Helid ayaa u furan kaamleyda u dhaxeyso 11-15 oo isku sheega in ay yihiin BIPOC. Dhamaan kaamleyda qabo baahida ka badan ayaa u baahan doono diwaan gelin guud & haddii loo baahdo habraaca deeqada waxbarasho. Haddii ay kuu joogaan dhowr qof u qalmo kaamleyda fadlan nasoo ogeysii marka aad diwaan geliso, markaas waxaan kaala hadli karnaa fursadaha jiro.

**Sidee isku diwaan geliya?**

*Ka qeyb qaatayaashu waa in ay ka wacaan CSC 802-864-2499 ama iimeylka tilly@communitysailingcenter.org si aad qadka talleefanka iskaga diwaan geliso, maadama boosaska banaan ay xadidan yihiin misna laga heli karin habka internetka ee online-ka ah.*